

Foomka Uqalmidda Sannadlaha ah ee Barnaamijka Gargaarka Cuntada ee Degdegga ah

Si aad ugu qalanto:

- **Caddee macluumaadka ku qoran shaxda hoose**
- **Caddee in:**
 - Aad joogtid Minnesota
 - Dakhliga qoyskaagu inuu yahay ama ka hooseeyo dakhliga ku qoran ee tirada dadka qoyskaaga

Kuwa soo socda LOOMA baahna:

- Looma Baahna Aqoonsi, Caddayn Cinwaan, Caddayn Dakhli, Caddayn Tirada Qoyska
- Looma Baahna Lambarka Soshiyal Sekuyurati, Caddayn Dhalasho/Xaaladda Socdaalka
- Looma baahna macluumaad aan ka ahayn waxa ku qoran foomkan oo lagaaga baahan karaa si aad cunto uga hesho goobtan

Magaca			Zip Code (ikhtiyaari)
Tirada Carruurta (0-17)	Tirada Dadka Waaweyn (18-64)	Tirada Waayeelka (65+)	Tirada Wadarta Qoyska

Oggolaansho Wakiilnimo: Waxaan oggolaaday shaqsiga (shaqsiyaadka) soo socda inay ii qaadan cuntada wakiil ahaan

Uqalmidda Dakhliga Sannadlaha ah: (300% ee Hagayaasha Saboolnimada Federaalka)

Tirada Qoyska	1	2	3	4	5	6	7	8
Dakhliga sannadkii ee ah ama ka hooseeya:	\$47,880	\$64,920	\$81,960	\$99,000	\$116,040	\$133,080	\$150,120	\$167,160

*Ku dar \$17,040 xubin kasta oo dheeraad ah

Waxaan caddaynayaa:

- In aan joogo Minnesota.
- Dakhliga reerkaygu waxa uu yahay ama ka hooseeya hab-raaca kor ku xusan.
- Xogta aan bixiyay waa sax inta aqoontayda iyo kartidayda ah.
- La i tusay oo aan akhriyay Bayaanka Takoor La'aanta ee USDA.
- La i tusay oo aan akhriyay Ogeysiiska Asturnaanta Xogta ee MN.

<input type="checkbox"/> Caddayn Afka ah	Taariikhda
--	------------

AMA	
<input type="checkbox"/> Saxeexa (ikhtiyaari)	Taariikhda

Bayaanka Takoor La'aanta ee USDA

Iyadoo la raacayo sharciga iyo xeerarka federaalka ee xuquuqda madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qaybqaadanaya ama maamula barnaamijyada USDA waxaa ka mamnuuc ah takooridda ku salaysan isir, midab, asal qaran, diin, sinji, naafonimo, da', xaalad guur, xaalad qoys/waalidnimo, dakhli ka yimaadda barnaamij taageero dadweyne, aaminsanaan siyaasadeed, aargudasho ama aargoosi hawlo xuquuq madani oo hore, barnaamij ama hawl kasta oo qabanayso ama maalgeliso USDA. (dhammaan saldhigyadu ma khuseeyaan dhammaan barnaamijka). Xalka iyo waqtiga kama-danbaysta ah ee xeraynta cabashooyinka wuu kala duwan yahay hadba barnaamijka ama dhacdada. Dadka naafada ah ee u baahan hab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta indhoolaha (Braille), far waaweyn, cajalad maqal ah, Luqadda Suuldhabaalaynta Mareykanka iwm.), waa inay la xiriiraan wakaaladda Gobolka ama Deegaanka ee maamusha barnaamijka ama la xiriir USDA oo u mar Telecommunications Relay Service lambarka 711 (cod iyo TTY). Waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxa lagu heli karaa luqado aan ahayn Ingiriisi. Si loo xareeyo cabashada takoorka barnaamijka, waa in la buuxiyaa Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA Foomka AD-3027 laga heli karo: <https://www.usda.gov/about-usda/general-information/staff-offices/office-assistant-secretary-civil-rights/how-file-usda-discrimination-complaint/how-file-program-discrimination-complaint> iyo xafiis kasta oo USDA ama adigoo warqad u qoraya USDA oo warqadda waa inay ku yaalaan dhammaan macluumaadka looga baahan yahay foomka. Si aad u codsato nuqul ah foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Ugu gudbi foomkaaga ama warqadda USDA sidan:

- boostada:**
U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; or
- faakis:**
(202) 690-7442; or
- iimayl:**
Program.Intake@usda.gov

Hay'addani waa bixiye fursad loo siman yahay.

Ogeysiiska Asturnaanta Xogta/Digniinta

Waxaad xaq u leedahay sida hoos timaada Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dawlada Minnesota. Xeerkani waxa uu ilaalinayaa sirtaada. Waxaan codsaneynaa macluumaad si aan u awoodno inaan kuu sheegno marka laga reebo dadka kale ee magaca la midka ah oo aan go'aansanno sida ugu wanaagsan ee aan kuugu adeegno.

Sharci ahaan, lagaagama baahna inaad na siiso macluumaadka. Si kastaba ha ahaatee, la'aanteed, ma go'aamin karno u-qalmiitanka ama ma sheegi karno tirakoob sax ah oo saameeya maalgelinta. Sharcigu wuxuu noo ogolaanayaa inaan la wadaagno macluumaadka aad siiso shaqaalaha Waaxda Carruurta ee Minnesota Youth and Families, The Food Group, Foundation for Essential Needs, iyo bangigaaga cuntada ee gobolka.

Waxa kale oo aad xaq u leedahay koobiyada macluumaadka aanu kaa hayno. Haddii aadan fahmin macluumaadka, waxaa laga yaabaa in lagu sharaxo. Haddii aadan u malayn in macluumaadku yahay mid sax ah ama dhammaystiran, fadlan ku sax shaqaalaha marfashka cuntada.



Macluumaadka Diiwaangelinta (Ikhtiyaari)

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Taleefan lambarka: _____

Cinwaanka: _____

Koodhka sibka: _____

Jinsigeygu waa:

- Dumar
- Rag
- Aanan lahayn wax lagu aqoonsado
- Jinsi beddelay
- Lahayn jawaab

Qowmiyadeedu waa:

- Hindi Mareykan / Dhalad Mareykan ah / Dhalad Alaska
- Aasiyaan / Jasiiradaha Baasifiga
- Madow / Afrikaan Maraykan ah
- Bariga Dhexe / Waqooyiga Afrika
- Cadaan / Anglo-ka
- Lahayn jawaab

Qoomiyaddaydu waa:

- Hisbaanik / Latino / Latina
- Aan Hisbaanik ahayn / Latino / Latina
- Lahayn jawaab

Yaa kale oo aad wax u iibinaysaa? (*Dadka aad la nooshahay, aad la wadaagto kharashaadka, oo aad cunto u kariso.*) Macluumaadkan waxaan kaliya u waydiinaynaa si aan u ogaano tirada carruurta, dadka waaweyn, iyo waayeelka aad wax u iibsanaayo.

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___

Magaca: _____ Taariikhda dhalashada: ___/___/___



Ku Soo Dhawoow Channel One Food Shelf. Hadafkeenu ayaa ah inaan xoojino helitaanka cuntada iyo inaan dhisno bulshooyin caafimaad qabta. Waxaan ku faraxsanahay inaan taageerno reerkaaga xilli ay food shelf ka mashquulsan tahay sidii hore abid. Waxa aad filan karto marka aad timaadid Channel One:

Diiwaangelintu waxay qaadataa dhowr daqiiqo. Uma baahnid inaad keento wax aqoonsi, caddayn ciwaan ama dakhli, ama caddaynta dhalasho ama xaalad socdaal. Waanu ixtiraamaynaa oo ilaalinayna sirtaada. Waxaan codsanaa macluumaad inagu filan sifo aanu kaaga dhex aqoonsano dadyowga kale ee kula magaca ah oo aanu u go'aansano sida ugu habboon ee aan kuugu adeegno. Macluumaadka ikhtiyaariga ah ee ah halka aad degan tahay iyo faahfaahinta ku saabsan adiga iyo reerkaaga ayaa waxay naga caawiyaan inaan kaa taageerno barnaamijyada kale sida gaarsiinta. Waxaad xaq u leedahay inaad aragto macluumaadka aan kaa hayno, oo aad la saxdo kooxdeena.

Dadka wax iibsada waxay u soo booqan karaan toddobaadle. Markaad soo gasho, waxaanu ku waydiinaynaa cidda aad wax u soo iibsanayso. Haddii aadan shakhsi ahaan wax u iibsan karin, waxaad ogolaansho siin kartaa qof kale inuu adiga ku matalo oo kuu soo iibiyo. Qoyskaagu waxa laga yaabaa inay soo dukaameestaan hal mar toddobaadkii.

Mashquul baanu nahay. Carruurta wehliyaan daryeel bixiyayaashooda ayaa si hufun loogu soo dhaweenayaa, halka dadka waaweyn ee u baahan caawimaadna ay la iman karaan qof wehliya. Marka shelf-ka cuntada buuxo waxa laga yaabaa in aan xaddidno tirada dadka waaweyn ee wax iibsanaya. Fadlan ixtiraam kuwa kale ee sugaya inay baarkinka dhigtaan, safka ugu jiraan inay iska diiwaangeliyaan, ama gaariga wax iibsiga qaataan.

Qoysasku waxay qaadan karaan hal gaadhi oo cunto booqasho kasta. Waxaad dooran kartaa cuntooyinka iyo cadadka aad isticmaali karto. Waxaan kaa caawin doonaa inaad hesho cunto qaar ka mid ah miiska Suuqa. Marka gaarigaagu wax iibsiga uu buuxsamo, waxaanu kaa codsan doonaa inaad dhammayso safarkaaga wax iibsiga. Waxaan leenahay dad badan oo wax iibsada maalin kasta. Fadlan tixgeli dadka kale ee wax iibsada.

Dhamaan halkaan ayaa si hufan loogu soo dhaweenayaa. Food shelf waa goob lagu soo dhaweeyo laguna ixtiraamo qof walba. Dhammaan halkaan ayaa lagu soo dhaweynayaa waxayna mudan yihiin in ay dareeman amaan. Si qaylo iyo ixtiraam darro ah oo lagula hadlo ama wax looga sheego kuwa kale, ka hor marida midba midka kale, ka soo qaadida cuntada gawaarida cuntada ee dadka kale, aan la siin nifaas kooxdu wax ku saarto iskifaalada iyo qaboojiyaasha ayaa waxay ka dhigeysaa dadyowga inay dareeman amaan daro. **Haddii dukaamaystayaashu ay dadyowga ka yeelaan ineey dareemaan ammaan darro, waxaa laga codsan doonaa inay baxaan.** Waxaa laga yaabaa inay u baahdaan inay u soo diraan qof u soo dukaameeya haddii ay sii wadaan inay dadka dareemsiyaan ammaan darro.

Mahadsanid
Kooxda Channel One Food Shelf

131 35TH Street SE ▪ Rochester, MN 55904 ▪ Taleefanka: 507-424-1707 ▪ [HelpingFeedPeople.org/Food-Shelf](https://www.HelpingFeedPeople.org/Food-Shelf)

Dukumeentiga waxaa la cusboonaysiiyay Janaayo 10, 2025

Nidaamyada Cabashada ee Channel One Food

Qiyaamkeena:

- Dadka ay haysato cunto yari ayaa udub dhexaad u ah wax kasta oo aan samayno.
- Waxaan abuurnaa dhaqan loo dhan yahay oo soo dhaweynaya oo ixtiraamaya kala duwanaanshaha dadka aan u adeegno, shaqaalaha iyo mutadawiciinta oo sharfaya qiimaha aasaasiga ah iyo sharafta dhammaan shakhsiyaadka.
- Waxaan dhisnaa oo kobcinnaa dhaqan horumar joogto ah iyo hal-abuurnimo.

Channel One Food Shelf waxaa ka go'an in ay taageerto deegaan ka madax banaan dhaqanka takoorka iyo bixinta fursad siman oo loogu adeego qoysaska oo dhan iyadoon loo eegayn midab, qowmiyad, asalka qaran, diin, lab iyo dheddig (ay ku jiraan aqoonsiga jinsiga iyo nooca galmada), naafanimada, da'da, caqiidada ama xaaladda qoyska.

Dadka wax iibsada waxay xaq u leeyihiin inay cabasho gudbiyaan marka ay aaminsan yihiin in si aan cadaalad ahayn, aan macquul ahayn, ama si hab-dhaqan takoor ama caga-juglayn ah loola macaamilay. Dhammaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta ayaa laga filayaa inay si xushmad leh ula dhaqmaan dukaameestayaasha.

Cabashooyinka waxaa samayn kara dukaameeyaha, qof ka tirsan gurigiisa ama wakiilkiisa. Inta badan dhibaatooyinka waxaa lagu xalliyaa la hadalka shaqaalaha Channel One, kuwaas oo qadariyo ra'yi-celinta dadka wax iibsada, diyaar u ah inay dhageystaan walaacyada iyo inay bixiyaan taageero.

Haddii taas aanay xal u helin walaaca, cabashooyinka waxaa loo soo diri karaa email-ka shaqaalaha Food Shelf ee foodshelf@channel-one.org ama adoo wacaya shelf-ka cuntada 507-424-1707. Haddii aad rabto inaad ku jawaab celiso, fadlan ka reeb magacaaga iyo lambarka telefoonka ee lagaala soo xiriiri karo

Cabashooyinka sidoo kale waxaa loo soo gudbin karaa Ashley Keller, Channel One Maamulaha Indha dheenta aadeeg Helida Bulshada, ashleykeller@channel-one.org ama 507-424-1728.

Dukaamleeyda iyo xubnaha bulshadu waxay sheegi karaan walaac ama rafcaan ka qaadan karaan go'aan kasta oo ay gaaraan shaqaalaha Channel One. Walaacyada waaweyn waa in si qoraal ah loogu gudbiyaa Maareeyaha Barnaamijyada iyo Adeegyada Hay'adaha iyo/ama Agaasimaha Guud. Rafcaannada waxaa dhagaysan doona kooxda agaasimayaasha Channel One ama guddiga agaasimayaasha, sida uu go'aamiyo Agaasimaha Guud.

Cabashooyinka sidoo kale waxaa loo gudbin karaa Waaxda Carruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska ee Minnesota: MNTEFAP.DCYF@state.mn.us ama la socda khadka caawinta cuntada ee MN 1-888-711-1151.

Machadkani waa bixiye fursad loo siman yahay.